Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文 iyo Tiếng Việt la soo geliyay https://go.usa.gov/xtBQC.

Noofambar 14, 2022-ka

Ku socota: Bulshada qabta Naafanimada Maskaxda iyo Korriinka (I/DD), hawl wadaagayaasha Qabiilka iyo shaqaalaha ODDS
Ka socota: Anna Lansky, Agaasimaha Ku meel gaarka ah, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka
Ujeedada: Wararka Bilaha ah ee Compass Project ee Noofambar

Waxaanu ku faraxsanahay in aanu bilawno marxalada xigta ee Compass Project. Waxaanu habka fikirka ee Charting the LifeCourse ku dari doonaa dhinacyo badan oo ka mid ah mashruuca. Tani waxaa ka mid ah Qorshayaasha Taageerada Shakhsi (ISP-yada). Tani waxay abuuri doontaa nidaam aad adigu udub dhexaad u tahay!

Barnaamijka LifeCourse wuxuu dhammaan dadka iyo qoysaska awoodaha iyo da'aha kala duwan leh ka caawiyaa in ay go'aansadaan waxa ay u baahan yihiin si ay ugu hoggaamiso nolol wanaagsan.

LifeCourse waxay leedahay waxyaabo kala duwan ‘tools’ iyo tilmaamo nidaamka qorsheynta ka dhiga mid fudud. Wuxuu kaa caawiyaa in aad ka fikirto waxa aad rabto noloshaada iyo siyaabaha laguu taageeri karo si taasi u dhacdo. Waxay sidoo kale kaa caawin kartaa in aad iska ilaaliso waxyaabaha aadan rabin noloshaada. Tallaabo kasta waxay diiradda saartaa hadafkaaga. Si adiga kuu gaar ah ayaad u isticmaali kartaa waxyaabahani ‘tools’ ama qof kasta oo aad rabto inaad ku darto. Inaga oo wadajirna, waxaynu si fiican u awoodi doonaa in aan sameyno kala doorashooyin fudud oo diiradda saara baahidaada qof ahaaneed.

Tani sidoo kale waa mid dhab u ah marka la eego dib u habaynteena ISP. LifeCourse waxay naga caawin doontaa in aan kula shaqeyno si loo abuuro qorshe si wanaagsan ugu habboon noloshaada. Waxaad horseed ka noqon

kartaa nidaamka haddii aad rabto, waanan ku caawin karnaa. Waxaanu kula qorsheyn doonaa taageerooyinkaaga iyo adeegyadaada. Qorsheyntu waxay noqon doonaa mid dabacsanaan dheeraad ah leh oo sahlan. Waxaanu rabnaa in qorshahaagu noqdo mid macno iyo waxtar kuu leh.

Maxay tani kaaga dhigan tahay?

Haddii aad tahay qof qaba Naafanimada Maskaxda iyo Korriinka (I/DD):

- Nidaamku wuxuu noqon doonaa mid sahlan. LifeCourse waxay ku siin doontaa maamul dheeraad ah ee qorsheynta noloshadaada iyo taageerooyin iyo adeegyo kuu shaqeeya. Waxaad dooran kartaa in aad beddesho qorshahaaga haddii noloshaadu isbeddesho ama haddii aad go'aansato in aad isku daydo wax kale. Waxaad xubnaha ka tirsan qoyskaaga iyo/ama dadka kuu dhow ku marti qaadi kartaa in ay kaa caawiyaan qorsheynta.

Haddii aad tahay maamulaha kiiska ama adeeg bixiye:

- LifeCourse Shaqeynaya oo lagu daro nidaamkeena qorsheynta ayaa abuuri doona nidaam fudud oo toos ah. Tani waxay ku siin doontaa wakhti dheeraad oo diiradda lagu saaro dadka aad la shaqeynayso. Maamulayaasha kiisku waxay yeelan doonaan tababaro badan oo ku saabsan qorsheynta oo lala leeyahay LifeCourse laga bilaabo Maajo.

Ka qayb qaado nidaamka dib u habaynta

Waxaanu jeclaan lahayn in aanu maqalno fikradaha aad qabto. Waxaa jiri doona siyaabo dhowr ah oo la nalagu siiyo taladaada.

- Waxaanu leenahay Kooxda Hawl-wadaagayaasha Bulshada oo gacan ka geysanaya mashruucani. Kooxdani waxay sii wadi doontaa shaqada adag ee kooxihii dib u habaynta ee hore bilaabeen.

- Waxaa jiri doona siyaabo badan oo looga qayb qaadan karo, sida ra'yi ururinta, kooxaha wax diiradda saara iyo isku dayida nidaamka cusub ee ISP iyo macluumaadka. Muhiim ayay noo tahay in aan maqalno codkaaga, gaar ahaan haddii aynaan weli helin. Waxaanu kula wadaagi doonaa macluumaadka cusub isla marka ay noqdaan kuwo la heli karo.

Ma jeclaan lahayn macluumaad dheeraad ah, ama ma haysaa su'aalo? Fadlan booqo bogga ODDS ISP ee internet-ka, OregonISP.org, ama email u dir Aniko Adany oo laga helo aniko.adany@dhsoha.state.or.us.

Waad mahadsan tahay qof kasta inaga oo sii wadna safarkani. Shaqadani waxay ku dhisan tahay dadaaladii hore oo dhan oo noo horseeday in aanu halkani joogno. La soco!

Si Daacadnimo leh,



Anna S. Lansky
Agaasimaha Ku meel gaarka ah
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena .

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811.Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.